# Golaha Wakiilladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Fadhigii 13aad ee Kal-fadhiga 17aad*

***Wakhtiga 09:41* AM** ilaa **11:30 Am**
***Taariikhda: - Salaasa 27 January 2026***

**Gudoonka: -** Md. Siciid Mire Faarax (Giire)

**Quranka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -** Dooda Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Hay'adda U-Diyaargarawga Aafooyinka.

Md. Maxamed Xasan Siciid *(09Min, 30Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, Mudanayaal Xildhibaano;

Ugu horrayn, waxaan jeclahay inaan halkan ku xuso in shalay doodda lagu soo jeediyey arrin la xidhiidha in Shir-Guddoonku xeerkan hor istaagay. Xeerkan markii hore waxa uu ahaa **Xeerka Aasaaska Hay'adda NARAD**, hase yeeshee imika magacii hay'adda waa la beddelay, waxaana loo bixiyey **NEDFOD**.

Sidaas awgeed, qodobkayga koowaad ee soo-jeedinta ahi waxa uu yahay in **wax-ka-beddelka iyo kaabista xeerkan lagu bilaabo magaca**, si cadna loogu muujiyo in xeerku yahay **Xeerka Hay'adda NEDFOD**, halkii hore ee NARAD.

**Qodobka 1aad – Magaca Xeerka** Waxaan soo jeedinayaa in **magaca xeerka si rasmi ah loogu beddelo NEDFOD**, si uu ula jaanqaado magaca cusub ee hay'adda.

**Qodobka 2aad – Qeexitaannada** Inkasta oo lifaaqa xeerka aan wax ka-beddel rasmi ah lagu samayn, haddana xeerku weli ma laha **qeexitaanno casri ah**. Tusaale ahaan, erayo muhiim ah sida: **masiibo baaxad leh, yareynta khatarta (risk reduction) iyo kaydka raashinka istaraatiijiga ah (strategic food reserve).**

ma aha kuwo si cad loo qeexay. Tusaale ahaan, marka la yidhaahdo *kayd raashin istaraatiiji ah*, ma carbs-ka ayaa laga wadaa, mise cuntooyin muddo-dheer lagu kaydin karo?

Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in **qodob cusub lagu daro xeerka**, kaas oo si cad u qeexaya erayada muhiimka ah, si loo yareeyo is-faham la'aanta iyo fasiraadaha is-khilaafsan marka xeerku dhaqan galo.

**Qodobka 3aad – Ujeeddooyinka Hay'adda** Wax-ka-beddelka lagu sameeyey ujeeddooyinka hay'adda waxa lagu daray: **cilmi-baadhis, Tiknoolajiyad iyo wacyigelin**

**bulsho.** Tani waxa ay suurto-gelinaysaa horumar buuxa oo waafaqsan heerarka caalamiga ah. Waxaa si gaar ah loo xoojiyey ka-hortagga, diyaargarowga iyo wacyigelinta bulshada.

Sidaas darteed, taladaydu waa in **faqrad gaar ah lagu daro**, oo qeexaysa **isku xidhka siyaasadaha cimilada, deegaanka iyo amniga raashinka**, maadaama saddexdaasi si toos ah isugu xidhan yihiin.

**Qodobka 4aad – Xadka Dabaqadda Xeerka** Wax-ka-beddelka imika la sameeyey waxa uu daboolayaa: qorshayn, jawaab-celin, ka-soo-kabasho iyo yareynta saameynta masiibooyinka. Waxa kale oo si gaar ah loo nidaaminayaa **kaydka raashinka qaranka**. Qiimaynta guddidu samaysay waxay muujinaysaa in qodobkani yahay **lafdhabarta xeerka**, isla markaana meesha ka saaraya xadidnaantii hore.

Waxaan soo jeedinayaa in **farqad lagu daro Qodobka 4aad**, oo caddeynaysa in xeerku khuseeyo: hay'adaha dawladaha hoose, maamulada gobollada, iyo degmooyinka, maadaama jawaab-celinta degdegga ah ee xaaladaha masiibo ay inta badan ka bilaabato heer gobol iyo degmo.

**Qodobka 5aad – Aasaaska iyo Madaxbannaanida NEDFOD** Wax-ka-beddelka halkan lagu sameeyey waxa uu si cad u muujinayaa madaxbannaanida hay'adda, lahaanshaha hanti maadaama ay leedahay shakhsiyad sharciyeed (legal personality), iyo xaqa ay u leedahay laamo goboleed. Si kastaba ha ahaatee, xeerku si cad uma qeexayo: doorka Madaxweynaha ee la-xisaabtanka hay'adda iyo kormeerka Baarlamaanka, gaar ahaan Guddida Khayraadka.

Waxaan soo jeedinayaa **qodob cusub** oo si cad u nidaamiya la-xisaabtanka iyo kormeerka, isla markaana qeexa kaalinta ay Guddida Khayraadku ku leedahay hubinta in raashinka iyo khayraadku si caddaalad ah u gaadhaan dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka.

**Qodobada 6aad iyo 7aad – Qaab-dhismeedka Gudaha** Xeerku si faahfaahsan uma qeexayo: agaasimayaasha waaxyaha, unugyada farsamo (technical units), iyo qaab-dhismeedka gudaha ee hay'adda. Waxaan soo jeedinayaa in **qodobo gaar ah lagu daro** si loo nidaamiyo qaab-dhismeedka hay'adda.

**Qodobka 8aad – Guddida Qaran ee Maareynta Masiibooyinka** Wax-ka-beddelka jira waxa uu dhigaya in Madaxweynaha ama cidda uu wakiisho ay guddoomiye ka noqoto guddida, waxaana lagu daray wasiirro iyo xildhibaano.

Maadaama xeerkan uu ka horreeyey aasaaska **Wasaaradda Dawladaha Hoose**, isla markaana dalku u socdo **maamul-daadejin**, waxaan soo jeedinayaa in wasaaraddaas si rasmi ah loogu daro guddida heer qaran.

Sidoo kale, maadaama guddidani tahay mid qaran oo isku-duuban, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro: Ururrada bulshada rayidka, Jaamacadaha, Ururrada gaarka loo leeyahay, iyo Ganacsatada,

maadaama inta badan deeqaha iyo khayraadka lagu wajahayo masiibooyinka ay ka yimaaddaan ganacsatada dalka.

**Qodobka 9aad – Awoodaha iyo Waajibaadka Guddida** Wax-ka-beddelka imika la sameeyey waxa uu xooga saaray: qaadhaan ururin gudaha iyo dibedda, xog-ururin, iyo tababaro.

Arrimahani waxa ay si buuxda ula jaanqaadayaan **Sendai Framework** iyo nidaamka maamul ee caalamiga ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **dabagal iyo qiimayn (Monitoring & Evaluation)** si loo xaqiijiyo isla-xisaabtan rasmi ah oo ku saabsan lacagaha, raashinka iyo deeqaha la ururiyey, isla markaana Guddida Khayraadku door muuqda ku yeelato.

**Qodobka 13aad – Shuruudaha Guddoomiyaha Hay'adda** Qodobkani waxa uu xusay: 7 sano waayo-aragnimo, aqoon gaar ah, iyo xad da'yeed. Maadaama xeerar badan oo Somaliland ahi aanay lahayn shuruudo sidan u faahfaahsan, waxaan soo jeedinayaa in shuruudaha xilalka la isku waafajiyo xeerarka kale ee aynu ansixinnay, si ay u yeeshaan nidaam midaysan marka la magacaabayo masuuliyiinta qaranka.

**Qodobada 18aad iyo 20aad – Miisaaniyadda iyo Warbixinta** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **waajib sharci ah** oo dhigaya in hay'addu **warbixin sanadle ah** u gudbiso Golaha Wakiillada, isla markaana warbixintaasi ay si gaar ah u gaadho **Guddida Khayraadka**.

**Qodobada 21aad iyo 22aad – Xeer-nidaamiyeyaal** Inkasta oo qodobkani sax yahay, haddana xeerku ma cayimin muddada lagu soo saarayo xeer-nidaamiyeyaasha. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **waqti cayiman**, oo ah in **6 bilood gudahood marka xeerku dhaqan galo** lagu dhammeeyo xeer-nidaamiyeyaasha.

Mudanayaal, dooddayda waxaan ku soo gabagabaynayaa in xeerkan hore loo ansixiyey uu ahaa xeer aasaas u ah hay'adda. Hay'addu hore ayay u jirtay, waxaanna imika ka hadlaynaa **wax-ka-beddel iyo kaabis**. Sidaas darteed, waxa muhiim ah in **qodobka koowaad si cad loogu beddelo NEDFOD halkii NARAD**. Dooddaydu intaas ayay ku koobantahay. **Wasalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

**Md. Xuseen Aadan Cabdi** *(02 Min, 20 Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, Mudanayaal Xildhibaano iyo dhammaan shaqaalaha sharafta leh; **Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 8aad, faqraddiisa 9aad**, oo dhigaysa in Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Baduhu ka mid noqdo Guddida, dib loo eego. Sababta oo ah, marka ay masiibo timaaddo, inta badan waxa ay si toos ah u khusayso dhulka, gaar ahaan bariga iyo deegaanada miyiga ah, halka masiibooyinka badda ay aad u yar yihiin ama aan inta badan ku jirin xaaladaha degdegga

ah ee guddidani ka hawlgasho. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga laga reebo Guddidaas**.

Sidoo kale, **Qodobka 13aad, xarafka (H)**, oo dhigaya in Guddoomiyaha hay'addu noqdo muwaadin da'diisu u dhaxayso 30 ilaa 65 sano, waxaan soo jeedinayaa in **shuruudda da'da laga saaro**, maadaama ay xadidnaan ku keenayso helitaanka khibrad iyo karti buuxda.

Waxa kale oo xeerku dhigaya in Guddida ay ka mid noqdaan **laba xubnood oo laga soo kala xulayo Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiillada**. Waxaan soo jeedinayaa in **lagu daro laba xubnood oo ka mid ah culimada waaweyn ee dalka**, si ay door mug leh uga qaataan talo-bixinta iyo jihaynta qaran. Aad iyo aad baan idiinka mahadcelinayaa. **Wasalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

**Md. Abiibokor Siciid Cali** *(08Min, 30Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, Mudanayaal Xildhibaano, iyo dhammaan shaqaalaha sharafta leh; **Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

Ugu horrayn, waxaan **taageerayaa (second-garaynayaa)** soo-jeedintii uu hore u jeediyey Mudane Maxamed Xasan Siciid, ee ahayd in **wax-ka-beddelka iyo kaabista xeerkan lagu bilaabo magaca**, isla markaana loo beddelo magaca ay Guddidu soo jeedisay, kaas oo ah **Xeerka Hay'adda Maareynta Masiibooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka (NADFOR**.

Sidoo kale, waxaan ku darayaa in **xadka dabaqadda xeerka** lagu daro qodob si cad u qeexaya **dabaqadda juqraafiyeed (territorial scope)**, kaas oo u dhignaanaya sidan: *"Xeerkan waxa si buuxda loogu dhaqayaa dhammaan gobollada, degmooyinka iyo deegaan kasta oo ka tirsan Jamhuuriyadda Somaliland."*

**Qodobka 9aad – Awoodaha, Xilka iyo Waajibaadka Guddida** Markaan si qoto dheer u eegay awoodaha Guddida, waxaan arkay in loo baahan yahay in lagu daro awoodo aad muhiim u ah, kuwaas oo kala ah:

1. **Guddida Qaran ee Maareynta Masiibooyinka** waxay awood u yeelanayaan dejinta, hagidda iyo ansixinta siyaasadaha, istiraatijiyadaha iyo Qorshaha Qaranka ee Maareynta Masiibooyinka, iyagoo hubinaya in dhammaan hay'adaha la shaqeeya ay la jaanqaadaan jihada, mudnaanta iyo danaha Qaranka.
2. Guddidu waxay masuul ka noqonayaan **isku-dubbaridka dhammaan hay'adaha Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose iyo hay'adaha kale ee ku lug leh maaraynta masiibooyinka**, iyagoo dejinaya hab-raacyo mideysan oo lagu fulinayo hawlaha masiibooyinka.
3. Guddidu waxay **qiimayn ku samaynayaan khataraha masiibooyinka**, waxayna Xukuumadda u soo jeedinayaan ku dhawaaqista xaalad degdeg ah, iyagoo

hoggaaminaya isku-dubbaridka iyo jawaab-celinta marka xaalad degdeg ah si sharci ah loo dhaqan-geliyo.

4. Guddidu waxay **kormeerayaan siyaasadda, maamulka iyo kaydka Raashinka Qaranka**, waxayna go'aaminayaan sii-daynta iyo qaybinta raashinka marka ay timaaddo masiibo, raashin-yaraan ama xaalad degdeg ah oo qaran.

5. Guddidu waxay **kormeerayaan fulinta hawlaha masiibooyinka**, waxayna xaq u leeyihiin inay dalbadaan warbixino, isla markaana soo saaraan **warbixin sanadle ah**, iyagoo hubinaya in gargaarka la bixiyo si hufan, caddaalad ah, isla markaana la ilaaliyo xuquuqda iyo karaamada muwaadiniinta ay masiibooyinku saameeyeen.

**Qodobka 13aad – Shuruudaha Magacaabista** Qodobkani waxa uu xusay in xubnaha ama Guddoomiyuhu noqdaan **dad Muslim ah**. Maadaama xubnaha Guddida ay hore u yihiin masuuliyiin qaran, sida wasiirro iyo xildhibaano, oo dhammaantood ka tirsan bulsho Muslim ah, qodobkani waxa uu noqonayaa mid aan macno dheeri ah lahayn. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 13aad, xarafka (B)** laga saaro, si looga fogaado fasiraad khaldan oo muujin karta in ay jiri karaan masuuliyiin aan Muslim ahayn.

**Qodobka 18aad – Miisaaniyadda Hay'adda** Qodobkani waxa uu xusay kaliya xaddiga miisaaniyadda loo qoondeeyo hay'adda. Maadaama ay tahay **hay'ad qaran**, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro qodobadan:

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa **miisaaniyad sanadle ah oo gaar ah**, kuna jirta miisaaniyadda Qaranka, si loogu daboolo hawlaheeda sharci iyo fulineed.

2. Hay'addu waxay xaq u yeelanaysaa inay hesho **deeqo, kaalmooyin iyo tabarucyo sharci ah**, oo ka iman kara gudaha iyo dibadda, iyadoo shardi laga dhigayo in aanay ka hor imanayn xeerarka iyo shuruucda dalka.

**Qodobka 20aad – Warbixinta** Waxaan soo jeedinayaa in hay'addu diyaariso **warbixin sanadle ah oo faahfaahsan**, oo ka hadlaysa: hawlaheeda, isticmaalka miisaaniyadda, xaaladda masiibooyinka, iyo kaydka Raashinka Qaranka.

Warbixinta sanadlaha ah waxa loo gudbinayaa Xukuumadda, sidoo kalena waxaan **taageerayaa soo-jeedintii Mudane Maxamed Xasan Siciid**, ee ahayd in warbixintaas loo gudbiyo **Golaha Wakiillada**, si loo xaqiijiyo kormeer iyo isla-xisaabtan daah-furan.

Sidoo kale, hay'addu waxay soo saari kartaa **warbixino gaar ah** marka ay timaaddo masiibo qaran ama xaalad degdeg ah, kuwaas oo lagu wargelinayo hay'adaha ay khusayso iyo guud ahaan shacabk

**Md. Axmed Maxamed Hure (Barkhad)** *(05Min, 40Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, Mudanayaasha Golaha, shaqaalaha Golaha iyo Saxaafadda; dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: **Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

Mudane Guddoomiye, sida ay labada Mudane ee iga horreeyeyba u soo jeediyeen, aniguna waxaan qabaa in maadaama **xeerarkeena iyo hay'adaha dawladdu ay si joogto ah isu beddelayaan**, ay lagama maarmaan tahay in **xeerarkeennu la jaanqaadaan isbeddellada xukuumadeed iyo hay'adeed** ee ku imanaya meelaha lagu tilmaamay xeerka. Arrimahaas waxa ka mid ah **magaca hay'adda**, sida magacii hore ee *NARAD* oo loo beddelay magaca ay maanta hay'addu ku aasaasan tahay ee ah *NADFOR*. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in magacu sidaas si rasmi ah ugu soo baxo xeerka, anigoo arrintaas si buuxda ula qabta Mudanayaashii iga horreeyey.

Marka laga yimaaddo magaca, **dhismaha Guddiga Qaran ee Maareynta Masiibooyinka** marka si guud loo eego, waxa muuqata in Guddigu aad u ballaadhan yahay, isla markaana wasaarado badan lagu daray. Maaddaama ay hore ugu jiraan wasaaradaha khayraadka sida **Beeraha, Biyaha, Deegaanka iyo Horumarinta, iyo Xannaanada Xoolaha**, haddana in mar kale lagu daro **Wasaaradda Kalluumaysiga**, waxa ay keenaysaa culays iyo mashquul dheeraad ah.

Mudane Guddoomiye, maaddaama uu yahay **Guddi qaran oo talo iyo isku-duwid ah**, ma aha hay'ad fulin toos ah, sidaas awgeedna wasaaradaha waxa looga baahan yahay in marka horeba, **ka hor inta aan xaalad masiibo la gaadhin**, ay yeeshaan qorshahooda u gaarka ah. Sidaas darteed, anigu waxaan qabaa in **Guddigu koobnaado**, isla markaana aan wax kale lagu sii darin, gaar ahaan **Wasaaradda Kalluumaysiga**, oo aan u arko in runtii laga saaro Guddiga.

Arrinta ku saabsan **labada xubnood ee ka imanaya Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida**, xeerarka lagu aasaasayo hay'adaha qaranku waa in ay yeeshaan **tilmaamo isku mid ah**. Dhawaan ayaynu gacanta ku haynay xeerar kale oo la mid ah, sidaas awgeed haddii aynu doonayno in guddiyada la wada gaadhsiiyo ama la mideeyo, waa in **guddiyada oo dhan la waafajiyaa hal nidaam oo midaysan**.

Haddii kale, waxa lagu ekaan karaa **laba xubnood oo ka imanaya Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida**, kuwaas oo **Shir-guddoonku magacaabayo**. Anigu waxaan qabaa in aanay habboonayn in xeerarka qaarkood ay tilmaamaan guddiyo gaar ah, halka qaar kalena ay tilmaamaan xubno si toos ah uu u magacaabayo Shir-guddoonku. Sidaas darteed, waxa aan soo jeedinayaa in arrintaas **la waafajiyo**, isla markaana lagu ekaado nidaamka ugu dambeeyey ee ah **laba xubnood oo ka tirsan Baarlamaanka (Guurti iyo Wakiillo) oo ay magacaabayaan Shir-guddoonnada**, taasna aan lagu daayo.

Waxa kale oo aan qabaa in **culimada dalka** ay door muhiim ah ku leeyihiin arrimaha masiibooyinka iyo badbaadada bulshada. Inkasta oo si dhaqan ahaan ay uga muuqdaan hawlaha, haddana **si sharci ah uguma cadda xeerka**. Sidaas awgeed, waa in xeerku si cad u tilmaamaa in **hal ama laba xubnood oo ka mid ah culimada waaweyn ee dalka lagu daro Guddiga Qaran**.

Sidoo kale, Qodobkii uu hore u soo jeediyey Mudane Maxamed Xasan Siciid ee ahaa in **ganacsatada lagu daro Guddiga**, maaddaama ay leeyihiin **Rugta Ganacsiga (Chamber of Commerce)**, aniguna waan la qabaa. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in **Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga** si rasmi ah loogu daro Guddiga.

Mudane Guddoomiye, **Qodobka 9aad** ee ka hadlaya *awoodaha, xilka iyo waajibaadka Guddiga*, waxaan qabaa in erayga **"awoodaha"** laga saaro. Sababta oo ah, aynu **awood gaar ah siin mayno Guddiga**, ee waxa aynu qoraynaa **xil iyo waajibaad saaran**. Sidaas awgeed, waxa habboon in qodobka lagu daayo oo keliya **xilka iyo waajibaadka Guddiga**, isla markaana laga reebo erayga awoodaha.

Ugu dambayn, **Qodobka 13aad – Shuruudaha Magacaabista**, waxa muuqata in meelaha qaarkood ay ku jirto **soo noqnoqosho**. Halka hore waxa aynu ku sheegnay in xubintu tahay **muwaadin Jamhuuriyadda Somaliland ah**, haddana faqradda ugu dambaysa (H) mar kale ayaa lagu celiyey isla shuruuddaas. Arrinta **da'dana**, anigu waxaan qabaa in aanay ahayn shardi la xidhi karo.

Haddii aad eegto xubinta ugu horreysa ee Guddiga, waa **Madaxweynaha ama cidda uu wakiisho**, cidda uu wakiishana waa **Madaxweyne-ku-xigeenka**. Haddaba haddii aynu halkan ku xaddidno da' gaar ah, sida 65 sano, waxa ay si toos ah u burinaysaa qaab-dhismeedkaas. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **shuruudda da'da 65 sano laga saaro**, lana daayo **furfurnaan sharci ah** oo aan qofka lagu xidhin da'.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** ***(02Min, 42Sec)*** **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, aad iyo aad ayaad u mahadsan tahay.

**Qodobka 4aad – Xadka Dabaqadda Xeerka**, gaar ahaan faqraddiisa 2aad, waxaan jeclaan lahaa in loo habeeyo oo loo saxo sidan: *Xeerkan waxa uu si gaar ah u nidaaminayaa habka loo diyaarinayo loona maamulayo Kaydka Raashinka Qaranka.* Saxitaankan waxa uu si cad u muujinayaa ujeeddada qodobka iyo baaxadda uu xeerku khuseeyo.

**Qodobka 5aad**, gaar ahaan faqraddiisa 5aad, oo hadda u qoran in *"Xarunta guud ee hay'addu ku taallo Caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland ee Hargeysa"*, waxaan soo jeedinayaa in si rasmi ah loo habeeyo, loona dhigo: *Xarunta guud ee Hay'addu waxay ku taallaa Caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland.* Sidaas ayaana anigu jeclaan lahaa in qodobkaas loo saxo.

**Qodobka 8aad – Guddiga Qaran ee Maareynta Masiibooyinka (GQMM)**, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro: hal xubin oo ka mid ah culimada dalka, iyo hal xubin oo ka tirsan Rugta Ganacsiga. Sidaas awgeed, halkii ay tirada xubnaha Guddigu ka ahaan lahayd **11 xubnood**, waxaan soo jeedinayaa in ay noqoto **13 xubnood**.

**Qodobka 13aad – Wax-ka-beddelka ay Guddigu soo samaysay**, waxaan jeclaan lahaa in shuruudaha lagu soo koobo **faqradda (C)** oo dhigaysa in qofka la magacaabayo uu leeyahay **aqoon waxbarasho heer jaamacadeed**, isla markaana haysta ugu yaraan

**shahaadada koowaad (Bachelor Degree).** Waxaan soo jeedinayaa in shuruudaha kale laga reebo, si aanay carqalad ugu noqon muwaadiniinta shaqo doonka ah.

Sidoo kale, **faqradda (D)** ee ku saabsan khibradda shaqo, oo hadda dhigaysa in ay noqoto ugu yaraan **7 sano**, waxaan soo jeedinayaa in **lagu daayo 5 sano**.

Ugu dambayn, waxaan soo jeedinayaa in **faqradda (H)** ee tilmaamaysa **da'da** gebi ahaanba **laga saaro**, isla markaana aan qofka loo xidhin shuruud da'yeed marka la magacaabayo.

**Md. Axmed Dayib Aadan (Ku-caddeeye)** *(06Min, 54Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, Mudanayaal Xildhibaano; Xeerkan waa **xeer aad u muhiim ah**, waana runtii xeer u baahan in si qoto dheer loo hufo. Guddiguna si wanaagsan ayay uga soo shaqeeyeen, aniguna ugu horrayn **Lifaaqa Guddiga waan taageersanahay**.

**Cutubka 1aad** Anigu waxaan soo jeedinayaa in **laba qodob lagu daro Cutubka 1aad**.

**Qodobka 1aad**, maaddaama waxa dhacaya ay yihiin **masiibooyin saamaynaya muwaadiniin**, muwaadiniintaasina ay leeyihiin **xuquuq sharci ah**, haddii ay timaaddo wax gaabis ah oo ku yimaadda fulinta xuquuqdaas, waa in **cidda ka gaabisay lala xisaabtamaa**. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in **Qodobka 4aad loo raro Cutubka 1aad**, isla markaana loo habeeyo sida soo socota:

**Qodob: Xuquuqda Muwaadiniinta inta lagu jiro Xaaladaha Masiibooyinka**

Farqada 1aad. Muwaadin kastaa waxa uu xaq u leeyahay in la ilaaliyo **naftiisa, hantidiisa iyo karaamadiisa** marka masiibo dhacdo.

- **a.** In uu helo **gargaar degdeg ah oo aan eex lahayn.**
- **b.** In uu helo **xog rasmi ah oo sax ah** oo ku saabsan xaaladda masiibada iyo tallaabooyinka la qaadayo.

**Faqradda 2aad:** Ma jiro muwaadin laga qaadi karo **xuquuqdiisa Dastuuriga ah**, marka laga reebo xaddidaadaha sharci ahaan loo oggol yahay ee **lagama-maarmaanka u ah badbaadada guud**. Haddii ay dhacdo in xuquuqda gaarka ahi mararka qaarkood ka hor timaaddo tan guud, **danta guud ayaa la hormarinayaa**, waana mabda' uu tilmaamayo fiqiga Islaamku.

**Faqradda 3aad:** Hay'adaha fulinaya xeerkan waa inay xaqiijiyaan **ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo karaamada muwaadinka** inta lagu guda jiro hawlaha maaraynta masiibooyinka.

**Qodobka 2aad – Ilaalinta Xogta iyo Asturnaanta** Qodobkan oo aan anigu u raray **Qodobka 5aad**, waxa uu ka kooban yahay saddex faqradood:

**Faqradda 1aad:** Dhammaan xogta la ururiyo inta lagu jiro maaraynta masiibooyinka waa in loo adeegsadaa **ujeeddooyin sharci ah oo keliya**.

**Faqradda 2aad:** Waa mamnuuc in **xogta shakhsiga ah la faafiyo** ama loo adeegsado si ka baxsan ujeeddooyinka **badbaadinta iyo adeega bulshada**.

**Faqradda 3aad:** Hay'addu waa inay **dejisaa nidaam cad oo lagu ilaalinayo xogta**, kaas oo waafaqsan **xeerarka qaranka ee ilaalinta xogta iyo asturnaanta**.

**Cutubka Ugu Dambeeya – Qodobka 23aad** Waxaan ku soo kordhiyey **Qodobka 23aad**, kaas oo tilmaamaya **hufnaanta iyo isla-xisaabtanka**, isla markaana ka kooban laba faqradood:

**Faqradda 1aad:** Hay'addu waa inay **warbixin joogto ah u gudbisaa Golaha Wakiillada iyo Madaxweynaha**, kaas oo ah Guddoomiyaha Guddiga Qaran ee Maareynta Masiibooyinka.

**Faqradda 2aad:** Warbixintu waa inay ka koobnaataa: Waxqabadka Hay'adda, Isticmaalka miisaaniyadda iyo Heerka diyaargarowga masiibooyinka.

Faqradda ugu dambaysa ee qodobkan, **Golaha Wakiilladu waxa uu xaq u leeyahay kormeer iyo isla-xisaabtan buuxa** oo uu ku sameeyo Hay'adda, sida ay horeba u soo jeediyeen xildhibaano kale, arrintaasna **waan ku waafaqsanahay**.

**Qodobka Ciqaabta** Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, mar haddii hawl la gelayo oo ay tahay **hawl badbaado bulsho**, isla markaana lagu adeegsanayo **miisaaniyad qaran**, haddii xad-gudub yimaaddo waa in xeerku si cad u tilmaamaa **cidda xad-gudubka samaysay iyo ciqaabta ka dhalanaysa**. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa **Qodob ciqaabeed** oo ka kooban saddex farqadood:

1. Qof kasta ama hay'ad kasta oo ku xad-gudubta xeerkan waxa laga qaadi doonaa **tallaabo sharci ah oo waafaqsan xeerarka dalka**.
2. Xad-gudubyadu waxa ka mid noqon kara: musuq-maasuq, ku-takrifal kaydka Raashinka Qaranka, faafin xog khaldan ama xog sir ah, iyo diidmo ku timaadda fulinta amarro sharci ah inta lagu jiro xaalad masiibo.
3. Ciqaabtu waxay noqon kartaa **ganaax, xabsi ama labadaba**, iyadoo lagu salaynayo culayska dembiga.

Ugu dambayn, **waajibaadka Guddiga ee ku xusan Qodobka 9aad** iyo **waajibaadka Hay'adda ee ku xusan Qodobka 7aad** meelo badan ayay is-dul saaran yihiin. Sidaas awgeed, waxa loo baahan yahay in la sameeyo **habraac si cad u kala xadidaya masuuliyadaha**, maaddaama: Guddigu leeyahay ku dhawaaqista xaaladaha nooca qaran, Hay'adduna ay leedahay fulinta hawlaha, **iyo** Guddiguna masuul ka yahay isku-dubbaridka qaadhaanka iyo gargaarka dibadda, halka Hay'adduna ay xaq u leedahay dalbashada gargaar gudaha iyo dibaddaba.

Arrimahaas oo dhan waxa ay u baahan yihiin **in si sharci ah loo waafajiyo**, si aanay u iman is-faragelin ama jahawareer fulineed.

**Md. Saleebaan Nuur Warsame (Food)** *(01Min, 54Sec)*:- **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, aad iyo aad baad u mahadsan tahay.

**Qodobka 8aad**, waxaan soo jeedinayaa, sida ay horeba u soo jeediyeen xildhibaanadii iga horreeyey, in **Guddiga Qaran ee Maareynta Masiibooyinka** lagu daro: **hal xubin oo ka mid ah culimada dalka** iyo **hal xubin oo ka socda Rugta Ganacsiga**.

Sidoo kale, **Qodobka 13aad**, gaar ahaan **faqraddiisa (H)** oo ka hadlaysa **da'da muwaadinka**, waxaan soo jeedinayaa in **qodobkaas gebi ahaanba laga saaro**. Intaa waxa dheer, waxaan **second-garaynayaa dhammaan qodobadii uu Sheekhu hore u soo jeediyey**, kuwaas oo ahaa qodobo aad u muhiim ah, isla markaana wax weyn ka taraya dhammaystirka iyo hufnaanta xeerkan. **Wasalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** *(05 Min, 36 Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Marka hore, waxaan salaamayaa Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha, Bahda Saxaafadda iyo dhammaan intii goobta joogta; **Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

Mudane Guddoomiye, waxaan rabaa in aan si qoto dheer uga qayb qaato doodda xeerkan. Marka ugu horraysa, **magaca xeerka** waxa ku jira laba magac oo la isku daray: mid ka hadlaya **maaraynta masiibooyinka**, mid kalena ka hadlaya **Kaydka Raashinka Qaranka**.

Anigu waxaan soo jeedinayaa in **ereyga "maaraynta masiibooyinka" lagu beddelo "ka-hortagga masiibooyinka"**, maadaama **ka-hortaggu ka wanaagsan yahay maarayn**. In lala yimaaddo tallaabooyin lagu yaraynayo khataraha iyo dhibaatooyinka waa ka muhiimsan tahay in la sugo marka masiibadu dhacdo kadibna la raadiyo sida loo maamuli lahaa.

Tusaale ahaan, **abaaraha sannad walba soo noqnoqda**, oo mar kasta ku soo laabta dalkeena, waxa ay u baahan yihiin **siyaasad qaran oo ka-hortag ah**, ma aha oo keliya qorshe lagu maareeyo marka ay dhacaan. Khataro badan way jiri karaan, waana muhiim in la diyaariyo waxyaabihii lagu wajihi lahaa, balse ka-hortaggu waa tiirka ugu muhiimsan.

Sidoo kale, waxaan qabaa in **Kaydka Raashinka Qaranka** iyo **arrimaha masiibooyinka** ay yihiin laba arrimood oo kala duwan, inkasta oo ay is-kaabayaaan. Sidaas awgeed, magaca xeerka waa in **si caddaan ah oo habboon loo qaabeeyaa**, isla markaana ereyga *maaraynta* lagu beddelo *ka-hortagga*.

**Qodobka 8aad**, waxaan raacsanahay xildhibaanadii hore u hadlay ee soo jeediyey in la ballaadhiyo Guddiga uu Madaxweynaha u igmaday hawshan. Guddigaas waxaan soo jeedinayaa in lagu daro: **Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga**, oo ah xubin aad u muhiim ah, isla markaana horeba uga mid ahaan jirtay hawlaha noocan ah iyo **laba xubnood oo ka mid ah culimada dalka**.

Sababta oo ah, culimadu waa dad miisaan weyn ku leh bulshada, gaar ahaan marka laga hadlayo in shacabka lagu dhiirrigeliyo ka-qayb-qaadashada gargaarka, deeqaha iyo wax ka qabashada mushkiladaha soo kordha. Maadaama aynu nahay bulsho Muslim ah, **culimadu waa lama huraan**, sidaas awgeed waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas lagu daro, haddii aan laba xubnood lagu darin ugu yaraan **hal xubin oo culimada ka mid ah** ha lagu daro Guddiga.

**Qodobka 13aad**, oo ka hadlaya **shuruudaha lagu magacaabayo Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka Hay'adda**, waxaan soo jeedinayaa arrin kale oo muhiim ah. Xeerku waxa uu adeegsaday **xarfo Ingiriisi ah (A, B, C)**, halka afkeenna rasmiga ahi yahay **Af-Soomaali**. Sidaas awgeed, waxaan soo jeedinayaa in xarafyadaas lagu beddelo **xarafyada Af-Soomaaliga**, si ay ugu habboonaato afka, hadal-qoraalka iyo hab-xog-haynta qaranka.

Sidoo kale, anigoo u mahadcelinaya Guddigii gacanta ku hayey xeerkan, haddana waxaan si cad u soo jeedinayaa in **Qodobka 13aad, faqraddiisa (H)** ee xaddidaysa **da'da**, **gebi ahaanba meesha laga saaro**, maadaama ay keeni karto xadidnaan aan loo baahnayn.

Ugu dambayn, **Qodobka 15aad**, oo ka hadlaya **waajibaadka Hay'adda**, isla markaana ka kooban 18 qodob, waxaan soo jeedinayaa in **lagu daro qodob 19aad**, kaas oo odhanaya:

*Hay'adda ka-hortagga masiibooyinka waa inay diyaarsato qorshe qaran oo lagu wajaho laguna yareeyo aafooyinka soo noqnoqda, sida abaaraha, dababka iyo masiibooyinka kale, iyadoo si gaar ah mudnaan loo siinayo abaaraha, isla markaana la diyaarinayo qorshe qaran oo waara oo lagu dabaqi karo dalka.*

Md. Mubaarig Xuseen Maxamed (Xeel-dheere) *(02 Min, 18 Sec)* **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Mudane Guddoomiye, Mudanayaal Xildhibaano, dhammaantiin waan idin salaamayaa marka hore.

Ugu horrayn, waxaan **second-garaynayaa doodihii ay jeediyeen xildhibaanadii iga horreeyey**, gaar ahaan Mudane **Faysal Yuusuf Jaamac**, Mudane **Axmed Dayib Aadan (Ku-caddeeye)**, Mudane **Saleebaan Nuur Warsame (Food)**, iyo Mudane **Saleebaan Diiriye Barre**, oo ahaa xildhibaankii ugu dambeeyey ee ka hadlay.

Mudane Guddoomiye, **Qodobka 13aad**, gaar ahaan **faqraddiisa (C)**, waxa lagu sheegay in qofka la magacaabayo uu haysto **aqoon waxbarasho oo heer jaamacadeed ah**, ugu yaraan **shahaadada koowaad (Bachelor Degree)**, isla markaana mudnaan gaar ah la siinayo kuwa haysta culuum la xidhiidha: maaraynta masiibooyinka, maamulka iyo hoggaaminta, culuumta bulshada ama xidhiidhka caalamiga ah iyo culuumta deegaanka iyo isbeddelka cimilada.

Arrintaas waxaan ka leeyahay, Mudane Guddoomiye, in **dadkeenna badankoodu aanay haysan shahaadooyin si gaar ah ugu saabsan isbeddelka cimilada**, maadaama uu yahay cilmi ku cusub dunida, isla markaana dalkeenna ay aad u kooban yihiin jaamacadaha ama

machadyada bixinaya barnaamijyo si gaar ah ugu takhasusay maaraynta masiibooyinka. Sidaas awgeed, waxa ku filan in qofku haysto **shahaado jaamacadeed guud**, halka qodobka mudnaanta gaarka ah la siinayo takhasusyadaasna **laga saaro**, si aan shuruudahaasi u noqon kuwo cidhiidhi ku ah muwaadiniinta kartida leh.

**Faqradda (D)**, oo dhigaysa in waayo-aragnimadu noqoto ugu yaraan **7 sano**, anigu waxaan qabaa in arrintaasi ay adag tahay in la helo, sidaas awgeed waxaan soo jeedinayaa in **lagu beddelo 5 sano**, si ay u noqoto mid macquul ah oo la jaanqaadaysa xaaladda shaqo ee dalka.

**Faqradda (G)**, waxa ku jira **soo noqnoqosho**, maadaama akhlaaq-wanaagga horeba loogu xusay **faqradda (B)**. Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in **akhlaaq-wanaagga laga saaro faqradda (G)**, si looga fogaado ku celcelin aan loo baahnayn.

Ugu dambayn, **faqradda (H)** ee ka hadlaysa **da'da muwaadinka**, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in **gebbi ahaanba laga saaro xeerka**, isla markaana aan wax shuruud da' ah lagu xidhin qofka la magacaabayo, si loo helo fursad loo siman yahay oo ku dhisan karti, aqoon iyo waayo-aragnimo, balse aan ku dhisnayn da'.

**Cawad Cali Maxamed**
**Ag. W. Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal qoraalka**
--------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha G. ee Golaha Wakiilladda JSI**
----------------------------------------